MAYO CLINIC
HEALTH SYSTEM

XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA BUKAANKA

Patient Rights and Responsibilities (Somali)

Nidaamka Caafimaadka ee Mayo Clinic waxaa ka go'an inuu daboolo baahiyahaaga daryeelka caafimaadka ee ay qabaan bulshada aan u adeegno.

MAYO CLINIC HEALTH SYSTEM
mayoclinichealthsystem.org

©2021 Mayo Foundation for Medical Education and Research. All rights reserved. MAYO, MAYO CLINIC, Mayo Clinic Health System and the triple-shield Mayo logo are trademarks and service marks of MFMER.

MC3570-35SO

Xuquuqaha Bukaanka

Hoos waxaa ku qoran xuquuqaha gaarka ah

Bukaan ka ahaan, aniga, ama wakiilkayga sharci aan oggolaanshaha haysta, waxaan xaq u leeyahay:

- Inaan helo daryeel ayadoon la igu takoorin jinsigayga, qowmiyadayda, dalka aan kasoo jeedo, abtirsigayga, diintayda, luuqada aan ku hadlo, naafonimada jirka ama maskaxda, xaalada dhaqaale, jinsiga, nooca galmada aan ka helo, jinsiga/qofka aan isku arko inaan ahay, xaalada guurka, da'da, dhaqanka, ama meesha aan dhaqaalaha ka helo.
- In qoyska iyo dakhtarkayga si degdeg ah loo ogeysiiyo gelitaankayga iyo in cid walba oo qoyskayga kamid ah ka qaybqaataan go'aanada daryeelkayga.
- In la i ogeysiiyo inaan xaq u leeyahay in aan qaabilo dadka booqashada iigu imaanaya iyo/ama inaan diido.
- Inaan ogaado magaca dhakhtarka ama dhakhtarka kale ee qaadaya masuuliyadda aasaasiga ah ee daryeelkayga iyo inaan ogaado aqoonsiga iyo heerka xirfada ee dadka i daryeela.
- Inaan dhakhtarkayga iyo shaqaalahayga ka helo, ereyo aan fahmi karo, macluumaadka hadda jira iyo waxbarasho ku aadan xanuunka la iga helay, daaweyntiisa, waxa aan filan karo iyo adeegyada la bixiyo. Xogta hadda waxaa ku jiri kara natiijooyin kasta oo aan la filayn oo la xariira daryeelka, daaweynta, iyo adeegyada.
- Inaan helo xaqiijooyin iga caawinaya inaan fahmo Oggolaanshaha la ila socodsiiyay ee loogu baahan yahay daaweynta iyo Hanaanka kahor inta aan daaweynta bilaaban (marka laga reebo xaaladaha degdegga ah - DHS 124.05 (3)i).
- Inaan qayb ka noqdo qorshaha daaweynta caafimaadkayga. Inaan doorto ama inaanan dooran ka qayb noqoshada cilmi baarista tijaabada ah.
- Inaan helo daryeelka calaamadaha ka jawaabi doona, xataa haddii aysan la xariirin xaaladayda caafimaadka ee aasaasiga ah.
- Inaan helo qiimeynta la xariirta, maareynta, xanuunka.
- Inaan helo adeegyada xaaladaha degdegga ah haddii aan isku arko calaamado daran oo haddii daryeelkayga caafimaadka uu meesha ka maqan aan ka dhaxlaayo xaalad caafimaadka ee daran, daciifnimo saaid ah oo la xariira hawlaha jirka ama cillad daran oo ah xubin ama qayb kasta oo jirka ah.
- Inaan dakhtarkayga iyo shaqaalaha ka helo xog iyo waxbarasho ku aadan isbitaal ka saaristayda.
- Inaan helo daryeel tixgelin, ixtiraam leh laguna bixinaayo meel nadiif ah, badqab leh, iyo meel gaar loo leeyahay oo aan lahayn dayac, dhibaato, iyo xadgudub.
- Inaan ka fogaado xannibaadaha nooc walba oo aan caafimaad ahaan daruuri ahayn ama loo isticmaalo si qasab ah, edbin, aan habboonayn, ama aargoosi ku aadan shaqaalaha.
- Inaan helo qiimeynta la xariirta, qodobada, adeegyada ilaalinta.
- Inaan codsado inuu ila joogo qof i wehliya marka la i baaraayo. Haddii aad codsato qof ku wehliya, Nidaamka Caafimaadka Mayo Clinic wuxuu oggolaanayaa inuu qof kula joogo.
- Inaan helo daryeel iyo daaweyn aan meel oga dhaceyn qiyadkayga, dhaqankayga, diintayda, iyo falsafada nolasha.
- In wax laga qabto su'aalaha anshaxa ee ka dhasha daryeelkayga caafimaadka. In aniga iyo qoyskayga helaan taageero shucuur iyo mid nafsi. Dhameystir ama cusboonaysii dardaaranka hordhaca ah oo qeexaya rabitaankayga ku saabsan daryeelka caafimaadkayga haddii aan awoodi waayo inaan sheego rabitaankayga. Nidaamka Caafimaadka ee Mayo Clinic wuxuu tixgelin doonaa dardaaranka hordhaca ah ee ku dhisan qaab sharci ah. Dardaarankaan hordhaca ah waxaa kujiri kara rabitaankayga ku aadan sadaqeynta xubnaha iyo unugyada jirka.
- Inaan diido daaweynta la isiinaayo illaa heerka sharcigu ii oggol yahay iyo in la ila socodsiiyo cawaaqiib xumada caafimaadka ee ka dhalan karta ficiladayda.
- In la iisheego baahida loo qabo in la ii wareejiyo xarun kale iyo dookhyada kale, (marka laga reebo xaaladaha degdega ah 124.05(3)L).

sii socda

- In dhammaan xiriirada iyo diiwaanada laga aruuriyo daryeelkayga ay noqdaan kuwo qarsoodi ah.
- Inaan helo diiwaanadayda caafimaadka waqti macquul ah.
- Inaan baaro oo aan helo sharaxaadda ku saabsan kharashaadkayga ayadoo aan loo eegeyn cida lacagta bixinaysa iyo inaan helo macluumaadka ku saabsan kaalmada dhaqaale.
- Inaan helo macluumaadka ku saabsan xiriirka Nidaamka Caafimaadka ee Mayo Clinic iyo daryeelka kale ee caafimaadka ama xarumaha waxbarashada ee ku lugta leh daryeelkayga.
- In turjumaanka luuqada iyo adeegyada turjumaada luuqada inaan si bilaash ah ku helo.
- Inaan soo gudbiyo cabasho la iina sheego nidaamka dib loogu eegayo loogana hadlaayo cabashada anigoo aan ka cabsanayn aargoosi ama aargoosi uu sameeyo adeeg bixiyahayga ama ururka.

Masuuliyadaha Bukaanka

Hoos waxaa lagu qoray masuuliyado gaar ah.

Bukaan ka ahaan, aniga, ama wakiilkayga sharci aan oggolaanshaha haysta, waxaan masuul ka ahay:

- Inaan sida ugu badan ee macquulka ah ka qaybqaato, daryeelkayga, daaweynta iyo waxbarashada la xiriirta daryeelkayga.
- Inaan isku diyaariyo booqashada dakhtarka ama daryeel bixiyaha aana waydiiyo haddii aan qabo su'aalo ah. Inaan soo qaato daawo kasta oo aan qaato ayadoo ku jirta baakadeeda rasmiga ah.
- Inaan waqtiga saxda ah imaado xarunta balantayda daryeelka caafimaadka.
- Inaan xarunta caafimaadka soo ogeysiiyo waqti ku habboon haddii aanan qabsan karin balan.
- Inaan bixiyo macluumaad dhammaystiran oo ku saabsan xaaladayda daryeelka caafimaadka iyo taariikhda caafimaadkayga, ka warbixiyo daryeelkayga iyo khataraha caafimaad sida aan u arko, inaan waydiiyo su'aalo marka aanan fahmin waxa la ii sheegay ee ku saabsan daryeelkayga.
- Inaan ka hadlo baahiyaha daryeelkayga iyo sida aan u arko khataraha caafimaadkayga.
- Inaan waydiiyo su'aalo marka aanan fahmin waxa la ii sheegay ee ku saabsan daryeelkayga. Inaan adeegso su'aalaha hoos ku qoran haddii aanan aqoon waxa aan waydiiyo:
  - Waa maxay dhibaatadayda ugu wayn?
  - Maxay tahay inaan sameeyo?
  - Maxay arrintaan muhiim u tahay inaan sameeyo?
- Inaan daacad u noqdo daryeel bixiyahayga ama dakhtarkayga haddii aanan fahmin tilmaamaha ama haddii aanan awoodin inaan ku adeegsado guriga.
- Inaan daryeel bixiyahayga ama dhakhtarkayga u sheego wixii ku saabsan calaamadaha ama dhibaatooyinka daryeelka caafimaadka, xataa haddii aanay xiriirin xaaladayda daryeelka caafimaadka ee aasaasiga ah.
- Inaan ka warbixiyo heerka xanuunkayga oo aan qayb qaato qorshaynta daryeelka xanuunka ee ay bixinayaan dakhtarkayga iyo adeeg bixiyahayga.
- Inaan waco daryeel bixiyahayga ama dakhtarkayga marka isbadel ku yimaado xaaladayda.
- Inaan aqbalo natiijada ficiladayda haddii aan doorto inaanan ka qayb qaadan qorshooyinka daaweynta ee uu bixinaayo daryeel bixiyahayga ama dhakhtarkayga.
- Inaan daryeelo bukaanada, qoysaska iyo shaqaalaha; inaan gacan ka geysato xakameynta buuqa iyo qaska; oo aan raaco xeerarka ka dhanka ah cabista Tubaakada sida ku xusan Nidaamka Caafimaadka ee Mayo Clinic.
- Inaanan dhib ama waxyeelo u geysan bukaanada kale, qoysaska ama shaqaalaha.
- Inaanan waxyeelo u geysan hantida bukaanada, qoysaska, shaqaalaha iyo xarumaha.
- Inaan oofiyo waajibaadka maaliyadeed sida (lacag bixinta kharashka) ee ku baxaysa daryeelka caafimaadkayga sida ugu dhakhsaha badan.
- Inaan la socdo in isbitaalku uu xadidi karo ama joojin karo xuquuqda booqashada xaaladaha qaarkood, oo ay kujiraan laakiin aan ku koobneyn kuwaan soosocda:
  - Waxaa igu socdo waxqabadyo daryeel
  - Waxaa jira walaacyo la xariira xakameynta caabuqyada
  - Waxaa jira hab dhaqano xadgudub, hanjabaad ama waxyeelooyin leh noocay ahaadaanba
  - Waxaan u baahanahay nasasho ama inaysan dadku i arkin

Nidaamka Maareynta Cabashada

Haddi aan ku guuldareysano inaan kasoo baxno waxa aad filayso, waxaan kugu martiqaadaynaa in aad lana wadaagto welwelkaaga ku saabsan daaweynta, badqabka bukaanka iyo tayada daryeelka. Walaaca aad qabto waxaad u sheegi kartaa:

- Shaqaale kasta
- Dakhtarkaaga daryeelka ama dakhtarka
- Agaasimaha xarun kasta oo caafimaad ama waaxda isbitaalka
- Xafiiska Arrimaha Bukaanka

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad xaliso cabashada isla markiiba xiliga kasta oo ah xiliga adeega. Haddii aad isleedahay wax kamid ah cabashadaada/welwelka aad qabto looma xalin qaab aad ku qanacdo, waxaad soo gudbin kartaa cabasho rasmi ah waxaadna usoo gudbin kartaa Xafiiska Arrimah Bukaanka.

Xafiiska Arrimaha Bukaanka
Saacadaha Shaqada: Isniinta illaa Jimcaha
8subaxnimo ilaa 5galabnimo
Taleefonka: 844-544-0036
Iimayl: OPX@mayo.edu
Fakiska: 715-838-5999

Xogta aad bixiso waxaa eegi doona shaqaalaha ku habboon iyo hoggaanka ku lugta leh arrimaha daryeelkaaga. Ayadoo lagu xiraayo nooca welwelka ku haaya, Xafiiska Arrimaha Bukaanka ayaa raaci doona habraacyadooda gudaha wuxuuna kuula soo xiriir doona/cusbooneysiin doona hadba sida ugu habboon. Haddii heerka luuqadaada Ingiriiska tahay mid kooban (LEP), waxaa lagu siin doonaa turjumaan ama qoraal qoran. Haddii cabashada(cabashooyinka) aad qabto aan loo xalin qaab aad ku qanacdo, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad la xariirto xiriirada hay'ada ee lagu qoray gadaasha danbe ee dukumiintiga.

Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin
Division of Quality Assurance
(DQA, Waaxda Hubinta Tayada)
P.O. Box 2969
Madison, WI 53701-2969
Taleefonka: 608-266-8481
Fakiska: 608-267-0352

http://dhs.wisconsin.gov/bqaconsumer/HealthCareComplaints.htm

Guddiga Isku dhafka ah
One Renaissance Blvd.
Oakbrook Terrace, IL 60181
Lambarka bilaashka ah: 800-994-6610
Iimayl: complaint@jointcommission.org

Livanta LLC
BFCC-QIO
10820 Guilford Road, Suite 202
Annapolis Junction, MD 20701-1105
(888) 524 - 9900
(888) 985 - 8775 – TTY

Waaxda Adeegyada Carruurta iyo Qoysaska ee Wisconsin
201 E. Washington Ave., 2nd floor
P.O. Box 8916
Madison, WI 53708-8916
608-266-5335 (oo ay kujiraan TTY)

Xafiiska u hoggaansanaanta Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin
1 West Wilson, Room 561
P.O. Box 7850
Madison, WI 53707
608-266-9372 (oo ay kujiraan TTY)

Xafiiska Xuquuqda Macmiisha ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka
P.O. Box 7851
Madison, WI 53707-7851
608-266-2717